



Ventricular Septal Defect (VSD) Repair

Repaired Ventricular Septal Defect (Cilladda Duleelka Qalbaca Hoose ama VSD)
Hagaajinteeda



© 2012 The Children's Heart Clinic



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic, 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Cilladda Duleelka Qalbaca Hoose Hagaajisan ama VSD Ventricular Septal Defect Repair

Ventricular septal defect (cilladda duleelka qalbaca hoose ama VSD) waa duleel u dhexeeya labada qeybood ee soosaarista dhiigga wadnaha (eeg VSD). Duleelkan waxa lagu xiri karaa qaliin ahaan ama qalab tuubagelin oo ah kateetare.

Qalabka Xiritaanka Kateetaraha: Qalabka Amplatzer™ (St. Jude) ayaa loo isticmaali karaa si guudd in loogu xiro duleelka VSD ee murqaha. Waxaa hawshan lagu sameyn karaa sheybaarka tuubagelinta ama in la isku daro tuubada/qalliinka ama hab Iskudhafnaan ah O.R. (saalo qalliin oo leh sheybaar tuubagelin). Inta uu socdo qalliinka Iskudhafnaan, cirbad ayaa ilmaha lagu duraa hawamareenka midig oo kateetaraha ayaa lagu gelinayaa wadnaha geeska duleelka ama VSD. Qalabka Amplatzer™ (St. Jude) ayaa markaas la gelinayaa meesha ku habboon ee ah dhanka VSD.

- **Sookabashada caadiga ah keliya ka dib habka la isticmaalo kateetarka:** Carruurta intooda badan waxay hal habeen seexan doonaan Xarunta Daryeelka Wadnaha. Caadi ahaan, wuxuu ilmuhu guriga aadi doonaa maalinta ku xigta ka dib marka la saaro raajada wadnaha si loo xaqiijiyo in qalabku ku jiro boos sax ah.

Xiridda Qalliinka: Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameynayaa. Markaas waxaa ilmaha yar lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). *Xuubka sare, xargo, iyo wax la socda VSD* waxaa lagu xirayaa sharootada Dacron®. *VSD Murqo ah* ayaa marka hore la isku tolayaa (haddii ay wax yar ku filan tahay), oo waxaa lagula xirayaa sharootada Dacron, ama qeyb ka mid ah habka Iskudhafan (qalliinka iyo kateetaraha waxqabadka ah) ee qalabka Amplatzer™ (St. Jude). Mararka qaarkood, qodobbo ayaa loogu baahan yahay muruq fidsan oo ah saddex geesood si looga hortago daadadasho ah dhiigga oo ka imaan karta sharooteynta.

Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 3 ilaa 4 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Waxaa ilmaha badankooda lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsashada, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (mid ah faleebbe daawada ama IV daawada laga qaato iyo in dhiig laga qaado), faleebbe ama IV bannaanka ah, tuubooyinka xabadka ah oo dheecanka looga daadinayo, kateetaraha foley oo ah kan kaadidu geleysa, iyo badanaa, xargaha batariga wadnaha oo meelgaar ah.
- Sookabashada Caadiga ah Qalliinka Ka-Dib: Tuubada neefsashada ayaa badanaa laga saarayaa wax yar ka dib qalliinka ama maalinta xigta. Tuubbada dhexe ayaa loo deynayaa ilaa inta dhiig laga qaadayo iyo si daawo looga siiyo. Tuubooyinka xabadka badanaa waxaa looga saarayaa 24 ilaa 48 saac qalitaanka ka dib, markuu yaraado dheecaanka ka soo baxaya.
- Wakhtiga caadiga ah ee joogitaanka isbitaalka: Wuxuu ilmuhu caadi ahaan joogi doonaa isbitaalka 4 ilaa 7 maalmood ka dib xiritaanka VSD.

Qaadashada Daawooyinka Guriga: Carruurta waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga ku qaataan marka wax laga qabto VSD sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Antibiyootiga bakteeriyada waxaa la joojiyaa 6 bilood ka dib markuu duleelku xirmo/qalliin lagu sameeyo haddii aysan jirin dhaawac/dhiigmareen ku yaalla wadnaha.